Warsidaha

# CASRI

Caddadka 1aad | Janaayo | 2018

Lix Biloodle ay soo saarto Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta & Teknolojiyada



# Guul Qaran: Saxiixa Sharciga Isgaarsiinta Qaranka

**Miisaaniyadda Wasaaradda Boostada oo Seddax Jibaarantay**

**Soomaaliya iyo ITU oo Heshiis Iskaashi wada Gaaray**

# CASRI

Warsidaha CASRI, waa Lix Biloodle,
ay soo saarto Wasaaradda Boostada,
Isgaarsiinta & Teknolojiyada

**Cinwaan:**

: Jamhuria Road, P.O. Box 66, Mogadishu – Somalia.
@ : info@mptt.gov.so
: http://www.mptt.gov.so
: facebook.com/mpttsomalia
: twitter.com.com/mpttsomalia

# Tusmada




7 Shirweynaha Qaran ee Wadatashiga Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada

10 Golaha Wasiirada, Baarlamaanka iyo Aqalka Sare oo ansixiyay X. Isgaarsiinta

14 Guul Qaran : Saxiixa Sharciga Isgaarsiinta Qaranka

16 10 Sababood oo sahashay in si deg-deg ah loo ansixiyo Sharciga Isgaarsiinta

25 Dib u habaynta Maamulka iyo Qaab-dhismeedka Wasaaradda Boostada

27 Daraasad ku saabsan Baraha internetka ee Hay’adaha Dowladda

29 Xiriirka  ka dhexeeya go’itaanka Internetka iyo Dhaqaalaha Dalka

30 Furitaanka Xarunta Maamulka Internetka ee Hay’adaha Dowladda

31 Miisaaniyadda Wasaaradda oo saddex jibaarantay

32 Heshiis dhinaca Isgaarsiinta oo ay wada gaareen Soomaaliya iyo Jabuuti

34 Heshiis Iskaashi oo dhexmary Soomaaliya iyo ITU

Hordhac

# Hordhac

## HORDHAC

CASRI waa war-side cusub ay soo saarto Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyada oo loogu talo galay in lagu soo bandhigo waxqabadka Wasaaradda iyo farriimaha ay dooneyso in la gaarsiiyo dadweynaha.

Wargeyskan oo soo bixi doona lixdii biloodba mar, waxaa aasaas u ah inuu dhiirrigeliyo Saddexda rukun ee ay Wasaaraddan ku taagan tahay ama ka kooban tahay waxayna kala yihiin:

- Boosto: gudbinta farriimaha daabacan iyo alaabta
- Isgaarsiinta: gudbinta farriimaha codka iyo internetka ah
- Teknoolojiyada: gudbinta adeegyada kala duwan, iyadoo la adeegsanayo teknoolojiyada casriga ah.

Saddexdoodaba waxaa ka dhexeeya waa inay isku XIRAYAAN DADWEYNAHA. Sidaasi darteed, bay tahay wasaaraddani mid isku xirta wax kasta oo aan looga maarmin adeeg kasta oo la bixinayo ha ahaato mid dhaqaale, bulsho, dawladeed, iwm.

War-sidaha Casri wuxuu noqon doonaa halkii lagu soo bandhigayay adeegyadaas iyo qiimaha ay ku fadhiyaan isgaarsiinta iyo isku-xirka dadweynaha.

## BARO WASAARADDA

Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta & Teknoolojiyada waa hay'adda dawladeed ee heer federal ee ugu sarreysa ee u xilsaaran sidii loo dajin lahaa, loona fulin lahaa, siyaasadaha iyo sharciyada qaran ee la xiriira arrimaha Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyada.

Waajibaadka Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta & Teknoolojiyada waxaa ugu waaweyn:

- In la dajiyo siyaasadaha iyo shuruucda lagu dhaqayo isgaarsiinta, boostada, iyo teknooljiyada dalka
- In la horumariyo kaabayaasha isgaarsiinta iyo teknolojiyada ee dalka
- In la ilaaliyo danaha dadweynaha adeegsada boostada, isgaarsiinta iyo teknolojiyada
- In la abuuro dhaqaale ku saleysan aqoon, lana abuuro bulsho wacyi sarreysa.
- Si ay gudato waajibaadkeeda, waxaa Wasaaradda hagaya Dastuurka Jamhuuriyadda Soomaaliya iyo sharciyada kale ee la xiriira Wasaaradda.

## HIRAALKA

In muwaadiniin kasta uu helo adeegyo isgaarsiineed (noocyada kala duwan) oo la awoodi karo, tayo leh, isla markaana waara.

## WAXAAN QABANO

Wasaaraddani waxay u taagan tahay in la horumariyo, sare loo qaado, la isku xiro, lana sharciyeeyo adeegyada boostada, isgaarsiinta iyo teknoolojiyada si loo amba-qaado horumar dhaqan-dhaqaale.

## WAAJIBAADKA WASAARADDA

Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta & Teknoolojiyada waa hay'adda dawladeed ee ugu sarreysa dalka ee mas'uulka ah inay dajiso siyaasadaha iyo sharciyada ee arrimaha boostada, isgaarsiinta iyo teknolojiyada.

## QIYAMKA AASAASIGA AH

Hawlaha Wasaaradda waxaa hagaya qiyamkan aasaasiga ah:

- Hufnaan
- Daah-furnaan
- Isla-xisaabtan
- Sinnaan iyo caddaalad
- Hal-abuur

# Erayga Wasiirka



Sanadkii hore wuxuu Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyada u ahaa sanad waxqabad oo lagu tallaabsaday horumar ballaaran. Horumarkaas wuxuu madaxda dalka, shaqaalaha Wasaaradda iyo shacabka Soomaaliyeedba geliyay yididiilo cusub.

Waxqabadkii ugu ballaarnaa ee sanadkii tegay wuxuu ahaa ansixinta Sharciga Isgaarsiinta Qaranka oo muddo ka badan 10 sano qabyo ahaa, iyadoo dalku uu baahi weyn u qabo. Guushii laga gaaray sharcigaasi waxay ka mid ahayd waxqabadkii ugu waaweynaa ee sanadka.

Guusha laga gaaray sharcigaas ma ahayn mid ay Wasaaadda oo kaliya lahayd. Waxaan halkan uga mahad celinaya qof kasta oo kaalin ka geystay sidii guul looga gaari lahaa sharcigaas. Waxaan ka billaabayaa madaxweynaha qaranka, Mudane Maxamed C/laahi (Farmaajo) oo geed-fadhi u ahaa hawlaha aan qabaneynay, isla taageero buuxda siinayay.

Waxaa kaloo mahadnaq ballaaran aan u soo jeedinayaa guddoonka labada gole ee Baarlamaanka Soomaaliya, Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan (Jawaari), Guddoomiyaha Golaha Shacabka iyo Mudane Cabdi Xaashi C/laahi, Guddoomiyaha Aqalka Sare, kuwaasoo na siiyay taageero weyn.

Waxaa sidoo kale aad noola shaqeeyay labada guddi ee isgaarsiinta iyo warfaafinta ee labada aqal, gaar ahaan guddoomiyeyaashooda Xildhibaan Khaalid Macow C/qaadir iyo Senator Abdi Axmed Dhuxulow (Dhag-dheer).

Waxaan kaloo ammaan ballaaran aan u soo jeedinayaa Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda, Mudane Xasan Cali Kheyre oo si gaar ah noogala shaqeeyay guulihii aan gaarnay. Wuxuu xil gaar ah iska saaray in uu taageero u fidiyo hawlaha kala duwan ee ay Wasaaraddu waddo, gaar ahaan arrimaha sharciga iyo nidaaminta isgaarsiinta.

Waxaan sidoo kale ammaanayaa saaxiibadey aan ka wada tirsannahay Golaha Wasiirrada, gaar ahaan wasiiru-dawlaha Wasaaradda, Mudane C/laahi Bile Nuur iyo wasiir ku-xigeenka Wasaaradda, Mudane Ibraahim Yarow Isaaq oo gacan weyn igu siiyay hawlaha la ii igmaday, kuwaasoo la'aantood aan wax badan lagu guuleysan lahayn.

Hawshii aan soo qabanay sanadkii hore waxay aad uga yar tahay hawsha baaxadda leh ee taalla ee na sugeysa. Waxaan ku rajo weynahay haddii Alle oggolaado inaan sii laba-jibbaarno guulihii aan gaarnay, si aan dalka uga tagno taariikh loo aayo. Qof kasta oo hadafkaas gacan ka geysan karana waxaan ka codsanayaa inuu nagu taageero.

**Wasiirka Boostada, Isgaarsiinta & Teknolojiyada**
**Mudane Eng. Cabdi Cashuur Xasan**

# Wada-tashiyada Xeerka Isgaarsiinta Qaranka



(Abriil 2017)

Xeerka Isgaarsiinta Qaranka wuxuu muddo dheer ayuu hor yaallay baarlamaannadii Soomaaliya. Waxyaabaha uu u xayirnaa waxaa ka mid ahayd in laga wada qeybgalo talooyinkiisa ka hor intaan la ansixin.

Haddaba si arrintaasi loo fuliyo ayaa Wasaaraddu waxay qabatay kulamo badan oo la-tashiyo lagula yeelanayay bahda isgaarsiinta Soomaaliyeed.

Ujeeddada ugu weyn ee kulamada ayaa ahaa sidii uu dalku u yeelan lahaa sharci ay ka wada qeyb galeen, ra'yi  iyo taloba ay ku dareen dhammaan dhinacyada kala ee uu khuseeyo sharcigan.

Wada-tashiyadan waxaa lagu gorfeynayay xeerka isgaarsiinta, waxaana ka qeyb galay sharci-yaqaanno isugu jiray kuwo ka socda dhinaca dawladda iyo qaar kale oo ka socday dhinaca bahda isgaarsiinta.

Wada-tashiyadan oo waqti badan lagu bixiyay waxaa ka soo baxay is-faham fiican iyo in dhammaan daneenayaasha xeerkaan ay qaataan aragti mideysan oo ku aaddan xeeraka Isgaarsiinta.

Waxay tilmaameen in loo baahan yahay in la helo nidaam, sharci iyo siyaasad qeexan oo lagu horumarin karo adeegyada kala duwan ee isgaarsiineed ee ay bixiyaan shirkadaha isgaarsiinta.




# SHIRWEYNAHA QARAN EE WADA-TASHIGA ISGAARSIINTA IYO TEKNOLOJIYADA

(May 2017) – Ra'iisul Wasaaraha Soomaaliya, Mudane Xasan Cali Kheyre, ayaa furay Shirweynaha Qaran ee Wada-tashiga Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada, kaasoo lagu qabtay magaallada Muqdisho intii u dhexeysay 6dii illaa 8dii bisha May 2017.

Waxaa shirweynahan ka qeyb galaya illaa 60 xubnood oo ka kala socday Guddiga Baarlamaanka ee Isgaarsiinta, Wasiirrada isgaarsiinta ee dawlad-goboleedyada, shirkadaha isgaarsiinta iyo internet-ka iyo ururrada jaamacadaha.


Wasiirka Boostada, Isgaarsiinta & Teknolojiyada, Mudane Eng Cabdi Cashuur Xasan, ayaa sheegay in ujeeddada shirka uu yahay sidii loo dhisi lahaa kalsoonida dhinacyada iyo sidii bog cusub loogu furi lahaa xiriirka Wasaaradda iyo dhinacyada ay khuseyso, isla markaana looga wada shaqeyn lahaa wadaagista xogta iyo qorshayaasha.

"Inagoo ka duuleyna aragtida Xukuumadda, waxaan dooneynaa inaan jid cusub u jeexno hawlaha Wasaaradda si waxqabadka loo kordhiyo, loona tayeeyo.

Arrintaasna waxay ka billaabataa in la dhiso kalsoonida, wax kasta oo ku xigana way fududaanayaan," ayuu yiri Wasiirka.

Ra'iisul wasaaraha oo ka hadlayay munaasabadda ayaa carrabka ku adkeeyay muhiimadd ay isgaarsiinta iyo teknolojiyadu u leeyihiin horumarka iyo dhaqaalaha dalka.

"Isgaarsiinta iyo teknolojiyadu waxay udub-dhexaad u yihiin dhaqaale kasta. Waxaan ku adkeynayaa inaad ka wada hadashaan waxyaabaha mudnaanta koowaad idin leh, adinkoo xoogga saaraya sidii aad u xoojin lahaydeen xiriirka dhexdiina ah iyo kan aad la leedihiin dowladda, gaar ahaan Wasaaradda si aad gacan uga geysataan horumarka dhaqaale ee dalka," ayuu hadalkii ku soo gabagabeeyay Ra'iisul Wasaaraha.



# Talooyinkii ka s Qaranka ee Isga



**May, 2017**

Shirweynaha Qaranka ee wadatashiga isgaarsiinta oo uu soo xiray Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan (Jawaari) ayaa laga soo saaray talooyink muhiim ah:-

TALOOYINKA SHIRWEYNAHA

Ergadii ka soo qeybgashay shirweynaha qaran ee wada-tashiga isgaarsiinta iyo teknolojiyada waxay soo jeediyeen talaabooyinka hoos ku xusan:

QODOBO GUUD

1. In Wasaaraddu joogteyso kulamada noocan oo kale ah oo lagu kala warqaadanayo, lagu waadagayo qorshayaasha, isla markaana lagu dhisayo kalsoonida dhinacyada, iyada oo Shirweynaha kan xiga lagu qaban doono dowlad-goboleedka Jubbaland.

2. In la xoojiyo xiriirka ay Wasaaraddu la leedahay wasaaradaha qaabilsan isgaarsiinta ee dawlad-goboleedyada, iyadoo Wasaaraddu adeegyadeeda u sii marsiinayso wasaaradahan,

3. In qorshaha wasaaradda ee seddexda sano ee soo socota laga tixgeliyo qiimeynta baahiyaha dhinaca tiknolojiyadda iyo isgaarsiinta dowlad goboleedyadda.

4. In la xoojiyo wadashaqeynta wasaaradda iyo shirkaddaha isgaarsiinta, internetka iyo bahda waxbarashada, si loo horumariyo adeegyada ay bixiyaan.

5. In adeega astaanta qaranka ee internetka Dot.SO la gaarsiiyo dhamaan hay'adaha dowladda ee federaalka iyo kuwa maamul goboleedyadda iyada howshaasna ay gacanta ku hayso wasaaradda.

6. Wasiiradda isgaarsiinta ee dowlad goboleedyadda waxa ay soo jeediyeen in mashruuca taakuleynta isgaarsiinta iyo Tiknolojiyadda (ICT) lagu saleeyo baahida iyo mudnaanta deegaanadooda ka jirta si uu u yeesho saameyn waxgal ah.

**Eeg Bogga 9aad**

# oo baxay Shirweynaha arsiinta Dalka.




## Isgaarsiinta & Internetka

7. In baahi weyn loo qabo in la meel-mariyo xeerka isgaarsiinta ee qaranka oo aasaas u noqon doonta maareynta hirarka, shatiyada, iyo xiriirka ka dhexeeya dawladda iyo dhinacyada uu khuseeya xeerkan, fulintiisana loo dhaadhiciyo ilaa heer dowlad goboleed.

8. In Wasaaraddu ka shaqeyso sidii ay shirkaduhu u heli lahaayeen hal albaab oo ay u maraan dawladda, gaar ahaan dhinacyada rukhsadaha, canshuuraha, iwm.

9. Shirkaduhu waxay codsadeen in Dawladdu kala shaqeyso sidii loo abuuri lahaa jawi ku habboon ganacsigooda, iyadoo laga caawinayo sidii loo yareyn lahaa caqabadaha haysta shirkadaha ee xiriirka la leh arrimaha amniga.

## Teknolojiyada & Waxbarashada

10. In Wasaaraddu hormuud ka noqoto sidii teknolojiyada casriga ah loogu adeegsan lahaa adeegyada kala duwan ee dowladda sida ganacsiga, waxbarashada, caafimaadka, maaliyadda, iwm.

11. In la dhiirrigeliyo dhismaha machadyo farsamo oo dhinaca teknolojiyada, lana dhiirrigeliyo hal-abuurka dhallinyarada ee la xiriira arrimaha teknolojiyada si loo kobciyo shaqo-abuurka.

12. In kor loo qaado aqoonta cilmiga tiknolojiyadda ee shaqaalaha dowladda iyada oo dib loo howl gelinayo Machadka qaran ee isgaarsiinta iyo tiknolojiyadda.

**Eeg Bogga 10aad**




# Talooyinkii ka soo baxay Shirweynaha Qaranka ee Isgaarsiinta Dalka.

**Ka yimid bogga 9aad**

13. In Wasaaraddu kala shaqeyso Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha & Tacliinta Sare sidii manhajka waxbarashada Soomaaliya loogu dari lahaa maaddo la xiriirta teknolojiyada oo ka soo billaabaneysa heer hoose.

14. In dawladdu ay caawiso ururrada cilmibaarista iyo dalladaha waxbarashadda xarumo u qaabeysan sida maktabadaha oo ay ardeydu ka heli karaan adeegyada la xiriira teknolojiyada iyo adeeg Internet jaban.

15. In jaamacadaha Soomaaliyeed lagu dhiirri-geliyo inay ka faa'iideystaan adeegga astaanta qaranka ee internetka ee u gaarka ah waxbarashada (.edu.so).

Gabagabadii Shirweynuhu wuxuu si weyn ugu mahad celiyay dhammaan ka-qeybgalayaasha, si gaar ah wuxuu shirweynuhu ugu mahadceliyay Madaxda iyo aqoonyahannada sida firfircoon uga qeyb galay shirka.

Ugu dambayntii Wasiirka Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada, Mudane Eng. Cabdi Cashuur Xasan, ayaa u mahad celiyay Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Maxamed Cabdullahi (Farmaajo), Guddoomiya Golaha Shacabka Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan (Jawaari) iyo Ra'iisul Wasaaraha JFS Mudane Xasan Cali Kheyre oo taageero buuxda u muujiyay hawlaha ay waddo Wasaaradda.

# Golaha Wasiirrada oo ansixiyay Sharciga Isgaarsiinta Qaranka




Juun, 2017

Golaha Wasiirrada ee Xukuumada Federaalka Soomaaliya oo uu shir-guddoominayey Ra'iisal Wasaare Xasan Cali Khayre ayaa si aqlabiyad ku ansixiyay sharciga Isgaarsiinta .

Xeerkan oo soo jiitamayay sanado badan ayay wasaaraddu dardargelisay xilliyadii la soo dhaafay, si loogu guuleysto horumarinta iyo xeer-nidaaminta Isgaarsiinta dalka, isla markaana loo daryeelo xuquuqda isticmaalayaasha adeegyadan iyo shirkadaha isgaarsiinta dalka.

Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta & Teknoolojiyada ayaa bilihii la soo dhaafay qabanqaabisay wada-tashi ballaaran oo looga arrinsanayay xeerkan, iyadoo kulamadaas ay ka qeybgaleen qeybaha kala duwan ee bulshada, Guddiga Isgaarsiinta iyo Warfaafinta ee Golaha Shacabka, dawlad-goboleedyada, shirkadaha adeegga isgaarsiinta iyo internet-ka iyo bahda waxbarashada dalka.

Wasiirka Boostada, Isgaarsiinta & Teknoolojiyada Mudane Eng. Cabdi Cashuur Xasan, ayaa si weyn u soo dhoweeyay ansixinta Golaha Wasiirradu ay ansixiyeen Xeerka Isgaarsiinta Qaranka oo ay soo diyaarisey Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta & Teknoolojiyada.

Wasiirka Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyada, Mudane Eng Cabdi Cashuur Xasan, ayaa sheegay in ansixinta sharcigan uu ka mid ahaa waxyaabaha mudnaanta koowaad u leh hoggaanka cusub ee Wasaaradda, isagoo tilmaamay inuu xeerkaan uu wax badan gacan ka gaysan doono horumarka dalka gaar ahaan isgaarsiinta.

Wasiirka ayaa muujiyay rajada uu ka qabo in xeerkaan ay wada ansixiyaan labada gole ee dalka, Golaha Baarlamaanka iyo Aqalka Sare.



# Ansixinta Sharciga Isgaarsiinta ee Golaha Shacabka

Agoosto, 2017

Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa 9kii bishii Agoosto 2017 si aqlabiyad leh u ansixiyay Xeerka Isgaarsiinta Qaranka. Sharcigan ayaa loo gudbiyay Baarlamaanka billowgii bishii Luulyo ee la soo dhaafay ka dib markii wada-tashiyo lala yeeshay dhinacyada ku shaqada leh isgaarsiinta.

Xeerka isgaarsiinta wuxuu ku baaqayaa in la dhiso Hay'ad ka shaqeysa nidaaminta iyo horumarinta isgaarsiinta dalka, ilaalinta xuquuqda shirkadaha iyo dadweynaha, iyo sidii bulshadu uga qeyb qaadan lahayd horumarinta isgaarsiinta iyo teknoolojiyada dalka.

Mudane Cabdi Cashuur Xasan, Wasiirka Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyada, oo soo gabagabeynayay doodda xildhibaannada ayaa sheegay in sharcigan uu muddo horyaallay 3 baarlamaan illaa 2005tii, iyadoo isgaarsiinta iyo teknooljiyada caalamka ay isbeddeleysay.

Wasiirka wuxuu u mahadceliyay xildhibaannada Soomaaliyeed ee ansixiyay sharcigan.

"Waxaan dareensannahay saameynta ballaaran ee ay isgaarsiintu ku leedahay dhaqaalaha iyo bulshadaba. Sharcigan wuxuu guul weyn u yahay isgaarsiinta iyo shacabka Soomaaliyeed guud ahaanba.

Marar badan baa la isku dayay, laakiin laguma guuleysan. Guusha maanta waxay ku suurtogashay dadaal aan kala go' lahayn oo madaxda Wasaaradda ku bixisay sharcigan 4tii bilood ee la soo dhaafay" ayuu yiri Wasiir Cashuur.

"Shaqada rasmiga ah hadda ayay billaabaneysaa. Waxaan doonayaa inaan shacabka Soomaaliyeed iyo xildhibaannadaba u xaqiijiyo in mas'uuliyiinta Wasaaradda iyo xukuumaddaba ay naga go'an tahay in sida sharcigan dhigayo in hantida qaran ee 252 iyo dotSO ay ka faa'iideystaan dawladda iyo shacabka Soomaaliyeed, taasna kama galeyno gorgortan" ayuu hadalkiisa ku soo gabagabeeyay Wasiirka.

# Aqalka Sare oo Ansixiyay Sharciga Isgaarsiinta



Aqalka Sare ee Baarlamaanka Soomaaliya ayaa ansixiyay Xeerka Isgaarsiinta Qaranka oo ay hore u soo ansixiyeen Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Soomaaliya 9-kii bisha Agoosto.

Sharcigan ayaa waxaa oggolaaday 39 oo ka mid ah 40kii mudane ee fadhiga soo xaadirtay. waxaana inuu ansax yahay kuu dhawaaqay Guddoomiyayaha Aqalka Sare Mudane Cabdi Xaashi C/llaahi.

Ansixinta sharcigan ayaa noqonaya kii ugu horreeyay ee uu ansixiyo Aqalka Sare tan iyo markii la sameeyay dhammaadkii sanadkii hore.

Dowladda ayaa sharcigaan ku tilmaanay inuu yahay kii ugu muhiimsanaa ee sanadkaan xukuumaddu diyaariso.

Mudane Cabdi Cashuur Xasan, Wasiirka Boostada, Isgaarsiinta & Teknoolojiyada, ayaa soo dhaweeyay ansixinta Aqlka Sare ee xeerka isgaarsiinta Qaranka, wuxuuna sheegay in sharcigan uu muhiim u yahay dalka.

 “Waa sharci ay in mudda ahba sugayeen dhammaan inta daneysa arrimaha isgaarsiinta,” ayuu yiri.

“Maanta waa maalin kale oo taariikhi ah, waana tallaabo loo qaaday in sharci iyo kala-dambeyn loo sameeyo isgaarsiinta dalka, sababtoo ah sharcigan waa kii ugu da’da weynaa ee hor yaallay baarlamaannadii dalka soo maray muddo ka badan 10 sano,” ayuu intaa raaciyay Wasiirku.

Sharcigan ayaa ka caawinaya dawladda sidii ay u hagi lahayd isgaarsiinta dalka, u kordhin lahayd dakhliga ay dawladdu ka hesho isgaarsiinta, loogana qeyb qaadan lahaa amniga.

Wuxuu sidoo kale sare u qaadayaa xuquuqda macaamiishu ay ku leeyihiin shirkadaha iyo maal-gashiga ay heli karaan shirkadaha ka shaqeeya isgaarsiinta iyo internet-ka.

Ansixinta Xeerka Isgaarsiinta ayaa tilmaan cad u noqonaya guulaha waxqabad ee hoggaanka cusub ee Wasaaradda.

# Guul Qaran:
# Saxiixa Sharciga Isgaarsiinta Qaranka





**(Oktoobar 2017)**

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane Max'ed Cabdullaahi Farmaajo ayaa saxiixay sharciga isgaarsiinta dalka.

Bandhigga Saxiixa Sharcigan ayaa lagu qabtay xarunta madaxtooyada, waxaana kasoo qayb galay Guddoomiyaha Aqalka Sare Mudane Cabdi Xaashi Cabdullaahi, Ku simaha Guddoomiyaha ahna Guddoomiye ku xigeenka Golaha Shacabka Mudane Cabdiweli Ibraahim Sheekh Muudeey, Raiisul Wasaare Ku Xigeenka Xukuumadda Mudane Mahdi Maxamuud Guuleed, Wasiirro ka tirsan Golaha Xukuumadda, Xildhibaanno, aqoonyahanno iyo khubaro horay uga soo shaqaysay diyaarinta sharcigan.

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo) oo tilmaamayay sida uu ugu qanacsan yahay sida wadajirka ah ee looga soo wada shaqeeyay sharcigan isgaarsiinta ayaa ku ammaanay laamihii kala duwanaa ee dowladda ee ka soo shaqeeyey sharcigan.





Madaxweynuhu wuxuu kaloo xusay in natiijada wanaagsan ee ka dhalatay dadaalkaas ay qeexayso wada-shaqeynta wanaagsan ee ka dhaxaysa hayadaha dowladda.

“Waa xaqiiq in ay caqabado badan jiraan, waana garoowsannahy in dhibaatooyinka dalkeenna aan lagu xallin karin hal habeen, balse cid walba waa u muuqataa in dalku uu horay u socdo “ ayuu yiri Madaxweynuhu.

Wasiirka Wasaaradda Boostada Isgaarsiinta iyo Tiknaloojiyadda Xukuumadda Federaalka Soomaaliya Mudane Eng. Cabdi Cashuur Xasan ayaa sheegay in sharcigaan uu yahay sharcigii ugu waqtiga dheeraa dhanka ansixinta ee soo mara dalka maadaama laga soo shaqaynaayey tan iyo sanadkii 2005tii.

Dhinaca kale wuxuu xusay Wasiirku in sharcigan uu faa’iido u yahay dhammaan dhinacyada uu khuseeyo, isla markaana uu ilaalinayo xuquuqdooda.

Tariikhda Ansixinta Sharciga 2017

| 22 Juun | 09 Agoosto | 21 Agoosto | 02 Oktoobar | 20 Novembar |
|---|---|---|---|---|
| Ansixinta Golaha Wasiirada | Ansixinta Golaha Sacabka | Ansixinta Aqalka Sare | Saxiixa Madaxweynaha | Faafinta Rasmiga ah |

# Sooyaalka Sharciga Isgaarsiinta

## SOOYAALKA ANSIXINTA XEERKA ISGAARSIINTA QARANKA 2017

**22 JUN**
**GOLAHA WASIIRRADA**
**ayaa sharcigan ansixiyay ka dib markii uu soo maray wada-tashigii loo baahnaa.**

**09 AUG**
**GOLAHA SHACABKA**
**ayaa cod aqlabiyad leh ku ansixiyay xeerkan ka dib markii uu maray 3 aqris**

**21 AUG**
**AQALKA SARE**
**ayaa cod aqlabiyad leh ku ansixiyay xeerkan ka dib markii uu maray 3 aqris**

**02 OCT**
**SAXIIXA MADAXWEYNAHA**
**Madaxweyne Farmaajo ayaa si rasmi ah u saxiixay xeerkan oo noqonaya kii ugu horreeyay ee uu saxiixo**

**20 NOV**
**FAAFINTA RASMIGA AH**
**Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Qaranka ayaa diiwaan-geliyay xeerkan, ka dibna ku soo saaray Faafinta Rasmiga ah**

Qabyo-qoraalka xeerkan waxaa la billaabay sanadkii 2005-tii, wuxuuna horyaallay Baarlamaannadii 7aad, 8aad iyo 9aad.

Wuxuu xeerkaan taariikhda ku galay inuu ahaa kii ugu dheeraa ee isagoo qabyo ah horyaalay Baarlamaanka Soomaaliya.

Hase yeeshee, dadaallo aan kala go' lahayn oo habeen iyo maalin socday oo ay bixiyeen Wasiirka, Wasiiru-dawlaha iyo Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada ayaa dib loogu eegay sooyaalkii uu soo maray xeerkan, caqabadihii hor taagnaa iyo istaraatiijiyadihii horey loo adeegsanayay si xeerkaan loo meelmariyo.

Dadaalladaas ay madaxda wasaaraddu waqti badan geliyeen waxay ku go'aansadeen inay bedelaan istiraatijiyaddii hore, waxayna la yimaadeen mid cusub, taasoo keentay in sharcigani uu noqdo kii ugu horreeyay ee uu ansixiyo Baarlamaanka 10aad.

Sida shaxda bidix kaaga muuqata sharciga Isgaarsiinta Qaran waxaa markii ugu horreysay ansixiyay Golaha Wasiirrada dalka, ka dibna Baarlamaanka iyadoo Aqalka Sarena uu ansixiyay 21 Agoosto 2017, kaas oo ka dhigaysa sharcigan inuu noqdo kii ugu horeeyay ee uu Aqalka Sare ansixiyo.

2dii Oktoobar ayuu Madaxweynahu saxiixay, halka faafinta rasmiga ah ee dalkana lagu soo saaray 20kii Nofeembar 2017.

# 10 Sababood oo sahashay in degdeg loo ansxiyo Xeerka Isgaarsiinta Qaranka

Oktoobar 2, 2017 Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka, Mudane Maxamed C/llaahi Maxamed (Farmaajo) ayaa saxiixay Xeerka Isgaarsiinta Qaranka. Waxaan dib u eegeynaa waxyaabihii fududeeyay ansixinta sharcigan:

Intii uu sharcigan horyaallay baarlamaannadii 7aad, 8aad iyo 9aad waxaa dalka soo martay 3 madaxweyne, 8 ra'iisul wasaare, iyo 10 wasiir qaabilsan boostada iyo isgaarsiinta. Haddaba su'aasha isweydiinta mudani waxay tahay maxaa sahlay in sharcigan lagu ansixiyo muddo 5 bilood gudahood ah.

Jawaabta su'aashan waxaan u soo bandhigeynaa si ay uga faa'iideystaan hay'adaha kale ee dawladda iyo shacabkaba si tixraac looga dhigto mustaqbalka marka ay timaaddo xaalad noocan oo kale ah.

1 Mudnaan: Wasiirka cusub ee Wasaaradda, Eng Cabdi Canshuur, wuxuu markuu xilka qabtayba mudnaanta koowaad siiyay sharcigan sidii loo ansixin lahaa, sababtoo ah wuxuu dareensanaa in sharcigan ay wasaaradda iyo dalkaba wax badan kaga xayiran yihiin. Waxaa arrimaha u xayirnaa ka mid ah shardi ay IMF ku xirtay in deymaha lagu leeyahay Soomaaliya la cafiyo. Waxaa sidoo kale u xayirnaa in canshuur rasmi ah laga qaado shirkadaha oo dawladdu awood ku lahaato furaha 252 iyo in lala soo wareego astaanta internetka ee dotso. Dhinac kasta oo la eegaba waxaa u soo baxday inay muhiim tahay in la helo sharci isgaarsiineed, hawl kalena aan la qaban karin sharci la'aan.

2 Kulanka Guddoonka Baarlamaanka: Wasiirka, Wasiiru-dawlaha iyo Wasiir ku-xigeenkuba waxay horraantiiba kulan la qaateen Guddoonka Golaha Shacabka ee Baarlamaanka bal si u xog ogaalsadaan sababihii loo soo celiyay sharcigan. Guddoomiye Jawaari wuxuu keydka baarlamaanka kaga soo saaray qoraalkii ku lifaaqnaa markii sharciga la soo celinayay iyo waxyaabihii lagu sababeeyay. Sababta ugu weyn ee sharciga loo soo celiyay ayay Guddoonka Golaha Shacabka ku sheegeen in ay ahayd inaan wada-tashi ballaaran lala sameyn shirkadaha isgaarsiinta. Haddiise shardigaas la oofiyo inuu sahlanaan doono ansixinta sharcigan.

3 Mowqifka mideysan ee madaxda sare: Wasiir Cashuur wuxuu sidoo kale kulamo la yeeshay madaxda ugu sarreysa dalka, sida madaxweynaha iyo Ra'iisul wasaaraha si ay isku aragti uga noqdaan arrimaha khuseeya wasaaradda iyo sharciganba, taas oo sahleysa inay isku dhinac wax u wadaan. Isku-xirnaan la'aanta wasiirka, ra'iisul wasaaraha iyo madaxweynaha waxay xagal-daacin jirtay hawlaha Wasaaradda.

4 Aragti cusub: Wasiirka - oo kaashanaya Wasiiru dawlaha iyo Wasiir ku-xigeenka - wuxuu jeexay qorshe iyo istaraatiijiyad cusub. Ujeeddada qorshaha waxay ahayd in sharciga laga dhigo kan ugu horreeya ee la ansixiyo. Si taas loo gaaro qorshaha waxaa loo sameeyay jadwal kama-dambeys (deadlines) ay tahay in la gaaro si uusan u noqon mid waqtigiisu furan uahay.

Waqtiyada ugu muhiimsanaa waxay ahaayeen waqtiga ugu dambeeya ee loo qabtay shirkadaha inay soo gudbiyaan talooyinkooda; waqtiga ugu dambeeya ee dawlad-goboleedyada laga sugayay inay talooyinkooda soo bixiyaan; waqtiga qabyo-qoraalka laga sugayo garyaqaanka; waqtiga ay ka soo dhammaaneyso wasaaradda caddaaladda; waqtiga loo gudbinayo Golaha wasiirrada; waqtiga laga ansixinayo Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare. Wasiirka ayaa si gaar ah u kormeerayay in hawl walba ay waqtigeeda ku dhacdo.

**Waa socotaa**

**Eeg Bogga 18aad**

# 10 Sababood oo sahashay in degdeg loo ansxiyo Xeerka Isgaarsiinta Qaranka

**Ka yimid Bogga 17aad**

**5** Waayo-aragnimada Wasiiru-dawlaha iyo Wasiir ku-xigeenka: Marka laga reebo in wasiirku hoggaanka lahaa, wasiirku wuxuu aad uga faa'iideystay waayo-aragnimada wasiiru dawlaha iyo wasiir ku-xigeenka oo wasiir ku-xigeenno ka soo noqday Wasaaradda intii u dhexeysay 2011 illaa 2013, iyadoo weliba labadoodu ay yihiin xildhibaanno. Wasiirku wuxuu si gaar ah arrimaha sharciga ugu xilsaaray inuu kala shaqeeyo wasiir ku-xigeenka, halka wasiiru dawlaha uu ki hawlan yahay dardar-gelinta boostada qaranka. Waxay yeelan jireen kulamo joogto ah oo mararka qaarkood gaarayay xilliyada habeenkii iyadoo bil Ramadaan ay tahay.

**6** Kalsooni-dhisidda shirkadaha: Hawlaha ugu horreeya ee uu wasiir Canshuur sameeyay waxaa ka mid ahaa inuu ku dadaalay sidii loo dhisi lahaa kalsoonida ay shirkadaha isgaarsiintu ku qabaan wasaaradda. Si taas loo gaaro waxaa la qabtay kulamo dhowr ah oo loogu talogalay in lagu dhiso kalsoonida Wasaaradda iyo shirkadaha isgaarsiinta oo inta badan qolaba qolada kale ay ku eedeyneysay inay iyagu sharciga hor taagan yihiin. Kulamadaas wasiirku wuxuu shirkadaha ku celcelin jiray in ay muhiim tahay in bog cusub ay furtaan oo laga gudbo is-tuhunka iyo dagaalka, lana wada shaqeeyo. Wuxuu sidoo kale kulamo gooni gooni ah la yeeshay milkiilayaasha iyo madaxda ugu sarreysa shirkadaha isgaarsiinta, isagoo arrintaas uga dan lahaa in go'aanka uu fududaado oo wakiillada ay soo dirsanayaan ay soo siiyaan awood. Wuxuu ku qanciyay in sharciga uu iyaga dan ugu jiro, maadaama uu ilaalinayo hantidooda, isla markaana uu u furayo fursado maalgashi oo ay bankiyada caalamka kula xiriiri karaan. Wasiirku wuxuu dareensanaa in awoodda jilicsan (soft power), sida qancinta iyo galaangalku, ay yihiin habka ugu sahlan ee sharcigan lagu fulin karo, maadaama xilligan aysan jirin dawlad xoog badan.

**7** Ka-qeyb-gal: Waxaa qabsoomay dhowr kulan oo ay shirkadaha kaga qeyb galayeen geeddi-socodka lagu sameynayo xeerka. Waxay sameysteen guddi ay ku jiraan dhammaan shirkadaha isgaarsiinta iyo internetka, kuwaasoo muddo u fadhiyay sidii ay talooyinkooda ugu biirin lahaayeen sharciga. Waxaa talooyinkooda ururinayay qareenno la shaqeeya shirkadaha isgaarsiinta. Waxaa la qiray in kulamadii shirkadaha ay ka soo baxeen talooyin badan oo lagu kobciyay tayada sharciga, isagoo dhinaca kalena ay shirkaduhu dareemeen inay talo ku leeyihiin sharciga.

**8** Soo-koobid: Marka aad maqasho in sharciga la diidan yahay waxaa kuu sawirmeysa in gebi ahaantiisba lagu murunsanaa. Wasiirku wuxuu shirkadaha fursad u siiyay inay soo koobaan qodobada muranka dhaliyay iyo sida ay dhankooda u arkaan xalka. Qodobadaasna waxaa looga dooday kulamada la qabtay, waana la iska qanciyay labada dhinacba.

**9** Qareennada Dawladda: Markii ay shirkaduhu talooyinkooda soo gudbiyeen waxaa lagu wareejiyay Garyaqaanka Guud ee Qaranka, kaasoo isku eegay nuqulkii asalka ahaa, talooyinka shirkadaha iyo siyaasadda guud ee dawladda. Ugu dambeynta Garyaqaanku wuxuu soo gudbiyay nuqul kama-dambeys ah oo loo sii gudbiyay guddiga sharci-yaqaannada ee Wasaaradda Caddaaladda, kuwaasoo iyaguna ku soo biiriyay talooyinkooda. Waxaa halkaas ka soo baxay sharci lagu soo biiriyay talooyinka dhinacyada ay khuseyso, kadibna la waafajiyay sharciga iyo siyaasadda dawladda.

**10** Fahamka dalka iyo xiriirrada Wasiirka: Wasiirka oo dalka hore u joogay waxay ka caawisay inuusan waqti dheeri ah u baahneyn uu ku fahmo xaaladda dalka uu ku sugan yahay iyo sida wax loo xallin karo. Sidoo kale xiriirradiisii dhinacyada kala duwan ee ganacsiga iyo siyaasadda waxay ka caawisay inuu galaangal u lahaan karo in sharcigan uusan la kulmin caqabado

# Madaxweyne Farmaajo oo Guddoomay Haddiyad Astaamihii Boostada Soomaaliyeed ah



Agaasimaha Guud ee Boostada Jabuuti (Midig) oo Madaxweynaha JFS Mudane Max'ed C/llaahi Farmaajo Guddoonsiinaya haddiyad ka kooban astaamihii (Farangaboolooyin/Stamps) Soomaaliya 1960meeyadii ay Boostada Dalkeena isticmaali jireen.

# Qaar ka mida Farangaboolooyinkii dalka laga isticmaali jiray



# Shirkadaha iyo Hay'adaha oo laga doonayo inay sameystaan Sanduuq Boosto

Guddiga Dhaqaalaha ee Golaha Wasiirrada ayaa go'aamiyay in dhammaan wasaaradaha xukuumaddu ay faraan shirkadaha iyo hay'adaha is-diiwaangelinaya ama cusbooneysiinaya rukhsadaha ay la yimaadaan caddeyn muujineysa inay leeyihiin sanduuq boosto.

Kulankan oo uu shir-guddoominayay Ra'iisul Wasaare ku-xigeenka, Md. Mahdi Maxamed Guuleed, waxaa la isku afgartay in wasaaraduhu ay gacan weyn ka geysan karaan sidii loo dardargelin lahaa boostada dalka, iyagoo sameynaya tallaabooyin lagu dhiirrigelinayo isticmaalka boostada.

Wasiirka Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyada, Mudane Eng. Cabdi Cashuur Xasan, ayaa sheegay in guddi gaar ah oo uu madax u yahay Wasiiru-dawlaha uu u xilsaaray sidii ay u dardargelin lahaayeen Boostada Dalka, una beddeli lahaayeen qaabka ay hadda u shaqeyso oo caqabado badan ay ka hor yimaadeen.

Wasiiru dawlaha wasaaradda, Mudane Cabdullaahi Bile Nuur, oo soo jeediyay qorshaha Wasaaradda ee dhinaca boostada ayaa sheegay in dhowaan la billaabi doono in boostada dalka loo diri karo dalka dibeddiisa, ka dib markii bishii Luulyo ee sanadkan ay Wasaaraddu la soo saxiixatay Boostada Jabuuti heshiis wadashaqeyn ah oo dhex maraya Boostada Soomaaliya iyo midda Jabuuti.

Sanadkii 2013-kii ayaa la billaabay in la keeno boostada ka imanaysa dibedda, hase yeeshee ma suurtogelin in dibedda loo diro boostada ka baxaysa dalka.



Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Boostada C/laahi Bile Nuur

"Ciwaanka kaliya ee Soomaaliya ka jira waa sanduuq boosto, waxaana u baahan shirkadaha, macaamiisha bankiyada, jaamacadaha iyo xafiis kasta.

Waxaan dooneynaa inaan isbeddel weyn ka sameyno qaabka ay u shaqeyso Boostadu, waayo waxay astaan u tahay dawladnimada iyo ilbaxnimada, waxayna fududeysaa adeegyada ganacsiga iyo dawladdaba.

Haddaba waxaan dadweynaha ku wargelineynaa inay u diyaar garoobaan isbeddelada cusub ee lagu sameyn doono Boostada Qaranka" ayuu hadalkiisii ku soo gagabeeyay Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Boostada Mudane C/laahi Bile Nuur.

# BOOSTADA SOOMAALIYA

Sooyaal ka da' weyn gobonnimada

website: www.posta.so
facebook.com/postasomalia - twitter.com/postasomalia

| 1959 | 1991 | 2013 | 2017 | 2018 |
|---|---|---|---|---|
| Boostada ayaa ku biirtay ururka UPU | Boostada ayaa joojisay shaqada | Waxaa la billaabay adeegga boostada | Boostada Soomaaliya ayaa u soo wareegtay Jabuuti | Waxaa billaabaneysa dirista boostada |

# Taariikhda Boostada Soomaaliyeed

Taariikhda Boostada Soomaaliyeed waa mid fac wayn, sida shaxda kore kuu muujinaysana waxay Soomaaliya ku biirtay Midowga caalamiga ah ee Boostada Adduunka “Universal Postal Union” sanadkii 1959kii.

Taasi waxay muujinaysaa in Soomaaliya xornimadii ka hor ay lahayd sytem boosto oo shaqaynaya, waxaana arrintaas sii xoojinaya markii aad daalacatid farankaboolooyinkii laga isticmaali jiray dalka, oo qaarkood taariikhda ku qoran ay kuu muujinayaan in horraantii 1930meeyadii ay jireen farankaboolooyin Soomaaliya laga isticmaali jiray.

Maamulka cusub ee Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta ee uu horkacayo Eng Cabdi Cashuur Xasan, Wasiirka Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada waxay qaateen qorshe cad oo cusub oo dib loogu soo celinayo adeegga Boostada Soomaaliyeed.

Iyadoo qorshahan cusub laga duulayo ayuu Wasiirka Boostada u istaagay sidii miisaaniyad ku filan dib u soo noolaynta Boostada dalka loo heli lahaa, taaso oo uu ku guuleystay, waxaana Boostada Qaran keliya loo qoondeeyay misaaniyad gaaraysa 120 kun oo doollar, halka guud ahaan miisaanayadda Wasaaradda ay saddex jibaarantay sannadkaan

Qorshaha sanadka cusub ee 2018 ee Wasaaradda Boostada waxaa qayb muhiim ah ka ah in hay’adaha dowladda dhammaantood ay Wasaaradda Boostada ka wada furtaan sanduuqyo Boosto, sidaa si la mid ah ayay wasaaraddu u diyaarisay shirkadaha iyo shaqsiyaadka Soomaaliyeed qaab sahlan oo ay ku furan karaan sanduuq boosto iyaga u gaar ah.

Dhinaca kale waxay Wasaaraddu soo bandhigi doontaa adeegayda boosto oo ay u qabanayso bulshada Soomaaliyeed oo aan in muddo ah isticmaalin adeegga boostada.

BOOSTADA SOOMAALIYA

**War Magaalo Warqaduu Ku Yaal**

# QIIMAHA SANADKII EE SANDUUQYADA

QIIMAHA **20** DOOLAR

QIIMAHA GANACSIGA, JAAMACADAHA, HAY'ADAHA, IWM

QIIMAHA **30** DOOLAR

# Diyaarinta Qorshe Howleedka Wasaaradda




(Abriil 2017)

Hawshii ugu horreysay ee laga qabto Wasaaradda ayaa ahayd in qiimeyn lagu sameeyo xaaladda dhabta ah iyo caqabadaha hor taagan waaxyaha kala duwan ee Wasaaradda.

Si caqabadahaas wax looga qabto waxaa la sameeyay qorshe isugu jira 100-ka maalmood iyo 12 bilood oo ka billaabanaysay Abriil 2017, kaasoo qeexaya hawlaha mudnaanta leh ee waax kasta oo tirsan Wasaaradda.

> Waxaa dib u eegis lagu sameeyay howlaha waaxyaha Wasaaradda, iyadoo la qorsheeyay sidii loo horumarin lahaa adeegayda ay bulshada u hayaan.

Qorshahan ayaa ka mid noqday kuwii ugu faahfaahsanaa, isla markaana ugu diyaarsanaa ee ay Wasaaraduhu u gudbiyeen Ra'iisul Wasaaraha Soomaaliya Mudane Xasan Cali Kheyre.

# Dib-u-habeynta Maamulka iyo Qaab-dhismeedka Wasaaradda




Si loo dardar-geliyo hawlaha wasaaradda Boosatda, Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada waxaa isbeddel lagu sameeyay qaab-dhismeedka Wasaaradda si waajibaadka waaxyaha ay u noqdaan kuwo kala cad oo aan isku qasneyn.

Wasaaradda oo lahayd 11 waaxyood ayaa waaxyaha qaarkood waxay ahaayeen kuwo hoos taga waaxyaha, waxaana loo baahday in marka hore dib loo eego qaab-dhismeedka.

Si arrintaas loo fuliyo Wasiirka ayaa magacaabay guddi ka kooban 5 xubnood oo uu guddoominay Wasiiru-dowlaha Mudane C/laahi Bile Nuur, waxaa xubno ka ahaa Wasiiru ku-xigeenka, Agaasimaha Guud ee hore, iyo mas'uuliyiin kale oo dhinaca farsamada ka caawinayay.

Waxay guddigan sameeyeen foom lagu qiimeynayo baahida loo qabo waaxda, qaab-dhismeedka wasaaradaha kale, aqoonta iyo waayo-aragnimada agaasimaha xilka waaxda haya, iyo waxqabadka uu ka sameeyay waaxdaas, waxaana mid kastaba lagu bixinayay darajo, iyadoo mas'uul kasta uu goonidiisa qiimeynta u sameynayay.

Ugu dambeyntii qiimeyntii ay sameeyeen waxay ku soo taliyeen in waaxyaha Wasaaradda oo ka koobnaa 11 waaxyood in lagu soo koobo 7 waax oo keliya, iyadoo la baabi'yay 4 waaxyood oo lagu biiriyay waaxyo kale.

Waaxyaha la baabi'iyay waxay kala yihiin: Waaxda Hawlaha Guud, Waaxda Xusuus-dhawrka (archives), Waaxda Rukhsadaha iyo Waaxda Dakhliyada.

Labada waaxyood ee hore waxaa lagu biiriyay Waaxda Maamulka; Waaxda Rukhdsadaha waxaa lagu biiriyay Waaxda Isgaarsiinta; halka Waaxda Dakhliyada la baabi'yay, maadaama Wasaaraddu Boostada & Isgaarsiintu aysan shaqo ku lahayn inay qabato dakhli.

dhinaca kale waxaa isbedel lagu sameeyay Agaasime-waxeedyada Wasaaradda, iyadoo labo Agaasime-waaxeedyo ay xilkooda waayeen, kuwaas oo aan lahayn ama haysan shahaado heer jamaacadeed, halka beddelkooda lagu beddelay labo Agaasime oo kala haysta shahaadada heerka labaad ee Jaamacadda (Masters), iyadoo shahaadada heerka PhD.

# MADAXDA WASAARADDA OO SI DHAMAYSTIRAN UGU SOO WAREEGAY XARUNTA WASAARADDA

**Agoosto, 2017**

Madaxda Sare ee Wasaaradda ayaa si buuxda ugu soo wareegay dhismaha rasmiga ah ee Wasaaradda. Ra'iisul Wasaare Ku-xigeenka dalka, Mudane Mahdi Maxamed Guuleed, oo booqday dhismaha Wasaaradda ayaa ku bogaadiyay masuuliyiinta cusub ee Wasaaradda inay muddo kooban gudaheed ku guuleysteen inay si buuxda ugu shaqeeyaan xarunta rasmiga ah ee Wasaaradda.




Ra'iisul Wasaare Ku-xigeenku wuxuu sheegay in tallaabadani ay si weyn kor ugu qaadi doonto wax-soo-saarka iyo niyadda shaqaalaha, isla markaasna suurtogelin karta isla xisaabtan buuxa. Waa markii ugu horreysay ee dhismaha Wasaaradda ay si buuxda ugu shaqeeyaan mas'uuliyiinta Wasaaradda tan iyo markii ay burburtay dawladdii dhexe 1991-kii.

Laga soo billaabo 2014-kii markii la kala jaray wasaraadihii warfaafinta iyo boostada iyo isgaarsiinta, madaxdii ugu sarreysay ee Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta, sida wasiirka, ku-xigeenka iyo agaasimaha guud waxay xafiisyo ku lahaayeen dhismaha Wasaaradda Warfaafinta ee agagaarka madaxtooyada, halka shaqaalaha intooda kale ay ku hawl-galayeen dhismihii rasmiga ahaa oo ku yaalla degmada Boondheere.


Hase yeeshee, markii ay soo gabagaboobeen waxyaabo ka dhinnaa dhismaha oo la sameeyay bilihii la soo dhaafay, waxaa la soo xiray xafiisyadii kale, iyadoo madaxda wasaaraddu ay si rasmi ah ugu shaqo billaabeen xaruntii ay Wasaaraddu lahayd.

Wasiirka Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Tiknolojiyada Mudane Eng. Cabdi Cashuur Xasan ayaa sheegay in aysan suurtogeli karin fulinta qorshe-hawleedka Wasaaradda haddii aysan masuuliyiinta Wasaaradda iyo shaqaaluhu ku wada shaqeynin hal meel, isaga oo sidoo kale ka mahadceliyey martigelinta Wasaaradda Warfaafinta ee muddadaas dheer.

"Guuritaanka rasmiga ah ee madaxda wasaaradda iyo xiritaanka xafiisyadii kale waxay muujinayaan sida ay nooga go'an tahay inaan dalkeena iyo dadkeena u adeegno. Waxaan aaminsanahay inaan shaqo wanaagsan la qaban karin haddii maamulka sare iyo shaqaaluhu aysan isku meel ku shaqeyneynin, waayo ma jiri karaan wada-shaqeyn iyo isla-xisaabtan" ayuu hadalkiisii ku soo gabagabeeyay wasiirka.

# Daraasad ku saabsan Baraha Internetka ee Wasaaradaha Dowladda

> "Howshaan waxaan ku bilaabaynaa Wasaaraddeena Boostada, kaddibna waxaan ku xejinaynaa Wasaaradaha kale , inagoo rajaynayna inaan isbedel muuqda ka samayno waqti dhow"
>
> Eng. Cabdi Cashuur, Wasiirka Boostada, isgaarsiinta iyo Teknolojiyada




**May, 2017**

Wasaaradda Boostada ayaa soo bandhigtay sahan ay ku samaysay baraha internetka ee Wasaaradaha Dowladda.

Ujeeddada sahankan - oo la sameeyay horraantii bisha May 2017 - ayaa ah sidii sawir guud looga heli lahaa xaaladda baraha internet-ka ee Wasaaradaha Dawladda, taasoo hordhac u ah qorshe ay Wasaaraddu ku dooneyso in lagu horumariyo baraha hay'adaha dawladda, iyadoo laga caawinayo dhinacyada farsamada iyo diyaarinta xogaha.

Sahankan ayaa lagu eegayay 3 dhinac oo kala ah:
1) In Wasaaraddu leedahay cinwaan (domain) leh astaanta qaranka (.gov ama .so).
2) In cinwaanka uu shaqeynayo oo ay saaran tahay naqshad, iyo
3) Inay ku idil yihiin afafka rasmiga ah ee dalka, sida Soomaaliga, Carabiga iyo Ingiriisiga.

Sahanka ayaa lagu ogaaday in Wasaaradaha Dawladda (oo dhan 26) in 21 ka mid ah oo ah (77%) ay leeyihiin cinwaan (domain) wata astaanta qaranka, kuwaasoo ay ku jirto 1 wasaarad oo ku cusub Golaha Wasiirrada.

Dhinaca kale qiimeyn lagu sameeyay in cinwaannnada (domains) ay shaqeynayaan ayaa waxaa soo baxday in ku dhowaad 70% cinwaannadaas ay saaran tahay naqshad, halka 30% soo haray aysan waxba u saarneyn.

Sahanka ayaa sidoo kale lagu eegayay afafka ay warbixinnadooda ku soo bandhigaan baraha. Afka Ingiriiska ayaa ugu badan, iyadoo 60% baraha shaqeeya ay leeyihiin qeyb Ingiriis ah, halka 45% keliya ay leeyihiin qeyb Soomaali ah.

Bogagga ku qoran laba af (Soomaali iyo Ingiriis) waa 35%, taasoo muujineysa in qaarna ay leeyihiin mid Ingiriis ah, qaarna mid Soomaali ah oo keliya. Ma jiro hal bar oo leh qeyb Carabi ah, iyadoo afka labaad ee rasmiga ah uu yahay afka Carabiga.

Waxaa kaloo xusid mudan in xitaa baraha shaqeynaya ay aad ugu yar tahay macluumaadka ay bixinayaan, taasoo muujineysa in Wasaaraduhu u baahan yihiin in laga caawiyo diyaarinta xogaha lagu soo bandhigayo baraha.

Mudane Eng Cabdi Cashuur Xasan, Wasiirka Boostada, Isgaarsiinta & Teknolojiyada, oo ka hadlayay soobandhigista sahankan ayaa sheegay inay tahay wax aasaasi ah in hay'ad kasta oo dawladeed ay yeelato bar internet.

"Waxaan dejinay qorshe aan ugu talogalnay in dhammaan hay'adaha dawladda ay mid walba lahaato bar internet shaqeynaysa oo ay u dhammeystiran tahay xog ku qoran 3 af." ayuu yiri Wasiirka.

"Hawshaas waxaan ku billaabeynaa Wasaaraddeena – oo aan horay u lahayn bar internet -, waxaana ku xijineynaa Wasaaradaha kale, inagoo rajeyneyna in aan isbeddel muuqda ka sameyn doonno waqti dhow" ayuu hadalkiisa ku soo gabagabeeyay

# Xiriirka Dadweynaha ee Wasaaradda oo la xoojiyay

Xiriirka Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta ee dhinacada kala duwan ee warbaahinta aad buu u hooseeyay.

Si loo dhiso xiriirka Wasaaradda kala dhexeeya dadweynaha, hay'adaha iyo dalalka aan xiriirka leenahay, waxaan lagu guuleystay:


- Warbixinta Wasaaradda (Profile): Waxaa la diyaariyay qoraal qeexaya Wasaaradda iyo waxaayabaha ay qabato (profile), oo lagu qoray afafka Soomaaliga, Carabiga iyo Ingiriiska.

- Website: Wasaaraddu ma lahayn website shaqeeya. Si horseed loogu noqdo wasaaradaha, waxaa la sameeyay website cusub(www.mptt.gov.so) oo ay ku idil yihiin macluumaadka Wasaaradda.

- War saxaafadeed: Wasaaraddu waxay billowday inay soo saarto war saxaafadeedyo ku qoran saddex af (Soomaali, Carabi iyo Ingiriisi) si shacabka Soomaaliyeed, hay'adaha iyo dalalka saaxiibka nala ahba ay ula socdaan waxyaabaha ay qabaneyso Wasaaradda.

- Warbaahinta bulshada: Waxaa Wasaaradda loo sameeyay baro warbaahinta bulshada (Facebook, Twitter iyo YouTube) si macluumaadka Wasaaradda loola wadaago dadweynaha.

- Daraasado: Wasaaraddu waxay soo saartay daraasad ku saabsan sida ay wasaaradaha dowladdu u adeegsadaan baraha internet-ka, taasoo muujineysa heerka ay taagan yihiin wasaaradaha dawladda.



# Go'itaanka Internetka oo muujiyay xiriirka dhaqaalaha iyo Internetka

**(Luulyo, 2017)**

Muddo ka badan laba toddobaad oo ka kala tirsaneyd bilihii Juun iyo Luuyo 2017 oo adeegga internet-ka nooca dhulka hoostiisa mara ee fiber optic uu ka maqnaa guud ahaan gobollada Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya ayaa waxaa hakad galay adeegyo badan oo isugu jiray kuwo ganacsi, waxbarasho, iyo dawladeed intaba.

Wasiirka Boostada Eng Cabdi Cashuur Xasan ayaa sheegay in malaayiin doolar ay ku khasaraatay maalmahaaas uu maqnaa khadka, taasina ay muujisay in dalku uusan ku tiirsanaan karin xarig internet ah oo ay wax kasta ku dhici karaan.

Wasiirka ayaa sheegay in ay shirkadda Dalkom oo masuul ka ah adeeggan ay kala hadleen sidii looga gaashaaman lahaa in sidaan oo kale ay dib u dhacdo, taas oo keeni karta khasaare ka weyn midka hadda ka dhashay.

Mudane Maxamed Axmed Jaamac Maamulaha Shirkadda Dalkom Somalia ayaa faahfaahin dhinaca farsamada ah ka bixiyey qaabka uu u dhacay shilka iyo casharrada ay ka barteen, isagoo ballanqaaday inay hay'adaha kala duwan ee dawladda la kaashan doonaan sidii arrimahaas looga taxadari lahaa.

Xildhibaan Khalid Macow Cabdulqaadir Guddoomiyaha Guddiga Warfaafinta iyo Isgaarsiinta ee Golaha Shacabka ayaa kula dardaarmay dhammaan ka soo qeybgalayaasha in dalka baahi weyn u qabo in la helo adeeg isgaarsiin oo tayo leh, isaga oo xusay in xeerka isgaarsiinta uu muhiim u yahay horumarinta isgaarsiinta dalka, ayna hadda gacanta ku hayaan.

Wasiirka Wasaaradda Mudane Eng Cabdi Cashuur Xasan oo madasha ka hadlay ayaa u sheegay shirkadaha in Wasaaraddu ay diyaar u tahay inay ku caawiso sidii ay u tayeyn lahaayeen adeeggooda, dhinaca kalena ay u diyaar garoobaan in lagula xisaabtami doono wixii gaabis ah oo dhinacooda ka yimaada.

# Sida looga gaashaaman karo

Innagoo ka faa'iideysaneyna fursaddan, ayaanu jecel nahay inaan dhinacyada kala duwan la wadaagno tilmaamaha aan dooneyno in looga gaashaanto dhibaato noocan oo kale ah:

1. Shirkadda Dalkom waxaa laga doonayaa inay sameyso qaab xarigga looga ilaalin karo maraakiibta ku soo xiraneysa Dekedda Muqdisho, taasoo u baahan inay isla qorsheeyaan hay'adaha kale ee dawladda ee ay arrintaas khuseyso.

2. Shirkadaha ka shaqeeya internet-ka waxaa la farayaa inay sameystaan khad kale oo keyd ah (backup) si haddii mid wax noqdo ay ugu badbaadaan kan kale.



3. Waxaa ganacsatada lagu baraarujinayaa inuu dalka ka furan yahay fursad ganacsi oo ay ku maal-gashan karaan xarko kale.

Baahida internet ee sii kordheysa iyo kalsoonida lagu qababa waxay muujinayaan in loo baahan yahay xarko kale.

Wasaaraddu waxay ugu dambeyntii shacabka Soomaaliyeed uga mahad celineysaa dulqaadkii ay muujiyeen muddadii uu maqnaa khadka.

Waxaana rajeyneynaa in haddii la fuliyo talooyinkaas in laga gaashaaman doono inay soo noqoto cillad noocan oo kale ah.

# R/Wasaare Ku-xigeenka oo Xarigga Ka Jaray Xarunta Maamulka Internetka ee Hay'adaha Dowladda



**Agoosto, 2017**

Ra'iisul-wasaare ku-xigeenka dalka, Mudane Mahdi Maxamed Guuleed, ayaa si rasmi ah u furay xarunta dhexe ee maamulka Internet-ka Hay'adaha Dowladda (Network Operations Center - NOC) ee Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknooljiyada, taasoo ah middii ugu horreysay ee nooceeda ah ee laga hirgeliyo caasimadda.

Xaruntan oo laga qeybiyo Internet-ka lagu bixiyo xarigga dhulka hoostiisa mara (Fiber Optic)-ga ah oo la dhigay ilaa 15 xarumood oo ku yaalla caasimadda ayaa khadka internet-ka laga gaarsiiyaa illaa 26 hay'adood oo isugu jira Wasaarado iyo Hay'ado kale oo ka tirsan Dowladda Federaalka ah.


Mashruucan oo dhinaca maaliyadda uu ka taageero Bankiga Adduunka, wuxuu sidoo kale Wasaaradaha u fidin doonaa taageero dhinaca farsamo ah iyo cillad-bixin joogto ah.

Wasiirka Waxbarashada, Mudane Cabdiraxmaan Daahir Cusmaan iyo Garyaqaanka Qaranka, Mudane Dr. Cusmaan Cilmi Guuleed, ayaa ku tilamaamey xaruntan mid adeeg muhiim ah u haysa Wasaaradaha iyo Hay'adaha kale ee Dawladda, iyagoo intaas ku daray in adeeggan uu sare u qaadayo waxqabadka iyo wax-soo-saarka Hay'adaha Dawladda.

Mudane Cabdi Cashuur Xasan, Wasiirka Boostada, ayaa sheegay in adeeggan uu qeyb ka yahay waxyaabaha ay Wasaaraddu ku soo ceshaneyso kaalintii laga filayay ee ahayd inay adeegyo teknoolojiyad siiso Hay'adaha Dawladda.

"Waan dareensannahay in adeegga internet ee aan bixinno uusan wada gaarin dhammaan wasaaradaha iyo hay'adaha dawladda, welina loo baahan yahay in la kordhiyo xawaarihiisa. Hase yeeshee, waxaan ka shaqeyneynaa sidii adeeggaas loo ballaarin lahaa mustaqbalka dhow hadduu Alle idmo" ayuu yiri Wasiirka Boostada iyo Isgaarsiinta.

# Miisaaniyadda Wasaaradda Boostada & Isgaarsiinta oo Seddax Jibbaarantay




Miisaaniyadda loogu talo galay Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyada ayaa saddex jibbaarantay sanadka 2018 marka la barbardhigo halkii ay mareysay sanadihii 2015 iyo 2016, taasoo muujineysa sida Xukuumadda Nabad iyo Nolol ay uga go'an tahay in sare loo qaado kaabayaasha dhaqaalaha oo wasaaraddani ugu horreyso. Haddii dul mar lagu sameeyay sooyaalka miisaaniyadda wasaaradda ee 3dii sano ee la soo dhaafay (2015 illaa 2017) waxaa muuqaneysa in ay koror ballaaran sameysay intii ay dhalatay Xukuumadda Nabad iyo Nolol.

Miisaaniyadda Wasaaradda Boostada & Isgaarsiinta ee sanadkii 2015tii waxay ahayd $794,817, halka sanadkii 2016 ay noqotay 797,387, iyadoo kororku uu ahaa $2,570 oo keliya. Hase yeeshee, dib-u-eegistii lagu sameeyay miisaaniyadda markii la ansixiyay Xukuumadda Nabad iyo Nolol waxay noqotay 1,354,276, taasoo ah koror weyn, sida ku cad miisaaniyaddii uu ansixiyay Baarlamaanka bishii Diseembar ee la soo dhaafay.

Hase yeeshee, kororkii ugu ballaarnaa waxaa lagu sameeyay 2018, markaasoo ay sii laba-jibbaarantay, iyadoo laga dhigay 2,650,494. sida muuqata, markii lays barbardhigo sanadaha 2016 iyo 2018 waxaa la dareemi karaa in kororka miisaaniyadda wasaaradda uu saddex jibbaarmay.


Waxyaabaha ku cusub miisaaniyadda waxaa ugu weyn miisaaniyad dhan 1 milyan oo doolar oo loo qoondeeyay Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, taas oo ku cusub hay'adaha dawladda, waxaana la rajeynayaa inay kaalin weyn ka ciyaari doonto sidii loo nidaamin isgaarsiinta dalka, isla markaana sare loogu qaadi lahaa dakhliga Dawladda ka soo gala isgaarsiinta.

Sidoo kale waxaa miisaaniyad dhan $120kun doolar loo qoondeeyay boostada qaranka, taas oo ah markii ugu horreysay oo miisaaniyad gaar ah loo sameeyay kicinta boostada.

Mudane Eng Cabdi Cashuur Xasan, wasiirka Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyada ayaa sheegay in sanadkan ay u qorsheysan tahay in isbeddel weyn laga dareemo isgaarsiinta, teknoolojiyada iyo boostada dalka. "Ujeedkeennu waa horumarinta isgaarsiinta iyo teknoolojiyada dalka si ay qeyb weyn uga qaataan dhaqaalaha dalka. Mar kasta oo sare loo qaado lacagta dawladdu dib u gelineyso wasaaraddan waxaa la kordhi doono dakhliga khasnadda dhexe ku soo xaroonaya ee ka imaanaya isgaarsiinta iyo teknoolojiyada" ayuu yiri.

"Waxaan uga mahad celinayaa Ra'iisul-wasaaraha, Golaha Wasiirrada, gaar ahaan Wasaaradda Maaliyadda inay gacan nagu siiyeen in wasaaraddani ay hesho mudnaantii ay lahayd si ay u kordhiso dakhliga soo gala qaranka, uguna adeegto bulshada," ayuu hadalkiisa ku soo gabagabeeyay wasiirka.

# HESHIIS AY WADA GAAREEN SOOMAALIYA & JABUUTI



**Agoosto, 2017**

Wafdi uu hoggaaminayo Wasiirka Wasaaradda Mudane Eng. Cabdi Cashur Xasan, ayaa booqasho rasmi ah ku tagay dalka Jabuuti, iyagoo kulamo kala duwan la qaatay Masuuliyiinta kala duwan ee dalkaas.

Kulamadan ayaa waxaa si gooni ah looga wada-hadlay arrimaha xiriirka iskaashiga ee dhinaca hirgelinta Heshiiska Boostada Jabuuti "La Poste de Djibouti" iyo iskaashiga dhinaca horumarinta Isgaarsiinta.

Sidoo kale Xubanaha wafdiga ayaa waxa ay kormeer ku tageen Xarumaha Shirkada Djibouti Telecom iyo shaldhigga xargaha fiber optic-ga dalka Jabuuti.

Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta, Boostada iyo Isgaarsiinta dalka Jabuuti Mudane Mudane Cabdi Youssouf Sougueh ayaa waxa uu sheegay in ay doonayaan in ay wada yeeshaan labada dal ee Soomaaliya iyo Jabuuti xiriir dhow ee dhinaca iskaashiga isgaarsiinta iyo Boostada.

Wasiirka Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Tiknolojiyadda Mudane Cabdi Cashur Xasan ayaa ammaanay horumarka ballaaran ee Dowladda Jabuuti ka samaysay dhinaca horumarinta adeegyada la xiriira xargaha Fiber optic-ga isaga oo sheegay in ay wax badan ka faa'iideysan doonaan khibradda dowladda Jabuuti.

Wasiirka Boostada intii uu joogay Jabuuti waxaa u suurogashay inuu booqasho sharafeed ugu tago Ra'iisul Wasaaraha Jamhuuriyadda Jabuuti Mudane Abdulkadir Kamil Maxamuud.

Waxaa booqasho sharafeedkaas Wasiirka ku wehliyay Wasiiru-dawlaha Boostada, Isgaarsiinta & Teknoolojiyada, Mudane Cabdullaahi Bile Nuur. Halka dhanka Jabuuti ay goobjoog ahaayeen Wasiirka Isgaarsiinta Jabuuti iyo safiirka Jabuuti u fadhiya Soomaaliya.

Wasiirka Boostada iyo Isgaarsiinta Mudane Eng. Cabdi Cashuur ayaa uga mahadcelinayaa Ra'iisal Wasaaraha Jabuuti martiqaadka uu u fidiyay iyo taageerada joogtada ah ee ay xukuumadda iyo shacabka Jabuuti mar kastaba la garab taagan yihiin shacabka Soomaaliyeed.



# Warmurtiyeed ay soo wada saareen labada dal

**Agoosto, 2017**

Gaba-gabadii booqashada Wasiirrada Boostada iyo Isgaarsiinta ee labada dal ayaa si wadajir ah u soo saaray warmurtiyeed ku saabsan waxyaabihii ay isku afgarteen labada dhinac.

Qodobada ay labada dhinac isla saxiixdeen waxaa ugu waaweyn:

1. Waxay labada dal iska kaashan doonaan dhinaca horumarinta xargaha Viber Optic ah madaama ay saldhigyo badan ku yaallaan dalka Jabuuti, iyada oo la billaabi doono xiriirrada labada dal iyo shirkadaha isgaarsiinta Soomaaliya iyo Djibouti Telcom oo ku saabsan xarig cusub oo Fibre Optic ah, gaar ahaan xarigga Djibouti African Regional Express (DARE), oo isku xiri doona magaalooyinka Jabuuti iyo Mombasa, isagoo sii maraya dhowr deked oo ku yaalla Soomaaliya.

2. Dowladaha Soomaaliya iyo Jabuuti, gaar ahaan labada wasaaradood, ayaa waxa ay iska kaashan doonaan horumarinta iyo maamulka Isgaarsiinta iyo Tiknolojiyadda labada dal, wadaagista khibradaha iyo aqoonta la xiriirta isgaarsiinta, gaar ahaan dhinacyada isku-xirka gobolka Geeska Afrika, amniga internetka (cyber security), sharciyada isgaarsiinta, maamulka hirarka iyo lambarrada, iwm.

3. In la qabto dhowaan shir ay ka soo qeybgalayaan madaxda labada dal, shirkadaha isgaarsiinta Soomaaliya iyo Shirkadda Djibouti Telecom.

Wasiirka Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyada Soomaaliya, Mudane Eng. Cabdi Cashuur Xasan, ayaa sheegay ka dib go'itaankii ugu dambeeyey ee Internetka Soomaaliya in Wasaaraddu ay garowsatay in la dardar-geliyo helitaanka khad kale, maadaama aysan suurtogal ahayn in qaran dhan ku tiirsanaado hal xarig.

"Jabuuti waa dal aan wax badan ka faa'iideysan karno. Wuxuu leeyahay illaa 8 xarig oo fiber optic ah. Sidaasi darteed ayaan dooneynaa inaan ka kaashano sidii aan u horumarin lahayn isgaarsiinta iyo internetka Soomaaliya," ayuu yiri Wasiir Cashuur oo ka hadlayay heshiiska.

# Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta oo Heshiis Iskaashi la saxiixatay ITU




**Eng Cabdi Cashuur** Brahima Sanou



**Oktoobar, 2017**

Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyada ayaa caasimadda dalka Arjaniin ee Buenos Aires heshiis iskaashi kula saxiixatay Ururka Isgaarsiinta Caalamiga ah (ITU).

Ujeeddada heshiiskan ayaa ah sidii loo jaan-goyn lahaa qeybaha ay ITU ka caawineyso Wasaaradda, sida ay dhigayaan qaraaradii ka soo baxay ururkaas, kuwaas oo faraya Xoghayaha Guud ee ITU inuu kaalmo u fidiyo Soomaaliya maadaama ay ka mid tahay dalalka saboolka ah.

Heshiiskan ayaa ka dambeeyay ka dib markii Wasiir Cabdi Cashuur uu baaq toos ah ugu jeediyay Xoghayaha Guud iyo agaasimayaasha waaxyaha kala duwan ee hay'addaas mar uu dhowr bilood ka hor booqday Xarunta ITU ee Geneva, iyadoo diyaarinta heshiiskan ay Wasaaradda kala shaqeysay Xafiiska ITU ee Carabta oo Soomaaliya qaabilsan.

Heshiiskan ayaa dhigaya in ITU ay Soomaaliya ka caawin doonto dhinacyada ay ka mid yihiin: diyaarinta kaabayaasha iyo sharciyada isgaarsiinta iyo teknoolojiyada (ICT),



**Shirweynaha ITU ee 2017 Buenos Aires**

kor-u-qaadista aqoonta ICT, dhismaha Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, dhismaha Machadka Isgaarsiinta Qaranka iyo in sare loo qaado sidii teknoolojiyada loogu adeegsan lahaa waxbarashada, caafimaadka iyo adeegyada kale, iyadoo tixgelin gaar ah la siinayo qeybaha bulshada ee nugul.

Heshiiskan waxaa dalkeena u saxiixay wasiirka Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyada, Mudane Eng. Cabdi Cashuur Xasan, halka dhinaca ITU uu u saxiixay Agaasimaha Xafiiska Horumarinta Isgaarsiinta ee ITU. Brahima Sanou.




# SOOMAALIYA OO 34 SANO KA DIB SOO CESHATAY XUQUUQDA CODEYNTA EE URURKA ISGAARSIINTA CAALAMIGA AH (ITU)

**Oktoobar, 2017**

Wasiirka Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknooloojiyada ayaa ka qeybgalaya shirwweynaha Ururka Isgaarsiinta Caalamiga ah (ITU) oo 9-kii Sebteembar lagu qabatay caasimadda dalka Argentina ee Buenos Aires, ka dib markii wasaaraddu ku guuleysatay inay dib u soo ceshato xubinnimada buuxda ee ururkaas oo maqneyd tan iyo 1983-dii, kolkaas oo ay joogsatay bixinta qaaraanka sanadlaha ah.

Qaaraanka lagu yeeshay Wasaaradda muddadaas wuxuu gaarayay in ku dhow 2 milyan iyo bar, taas oo sababtay in wixii markaas ka dambeeyay ay Wasaaraddu si kor-joogto ah kaga qeybgasho shirarka, iyada oo aan lahayn wax cod ah.

Hase yeeshee, dadaal ay mas'uuliyiinta Wasaaraddu bixiyeen bilihii u dambeeyay waxaa lagu guuleystay in Soomaaliya laga cafiyo lacag ku dhow 1 milyan iyo bar doolar, waxaana la dajiyay qorshe soconaya muddo sanado ah oo lagu bixinayo baaqiga, iyadoo qeybtii 1aad oo dhan in ku dhow 80 kun doolar ay Wasaaraddu bixisay dhammaadka bishii hore.

Wasiir Cabdi Cashuur oo ka hadlayay shirkaas ayaa sheegay in xubinnimada ITU ay Wasaaradda ka caawin doonto sidii ay dib ugu heli lahayd adeegyada ay wasaaradaha dalalka caalamku ay ku leeyihiin ururkaas.

Wuxuu sidoo kale sheegay in tallaabadani ay fududeyn doonto sidii ITU ay dalka Soomaaliya uga kaalmeyn lahayd dhismaha kaabayaasha isgaarsiinta dalka oo aysan shirkaduhu si gooni gooni ah u maalgashan karin.

"Sharaf bay noo tahay inaan dib u soo ceshanay xubinnimada buuxda ee ITU-da. Ma dooneyno inaan korjoogto kaliya ka noqono ururka ITU-da oo hawlo badan ay nooga xiran yihiin, inagoo awoodna inaan cod yeelano." ayuu yiri Wasiirka oo intaa raaciyay

"Waxaan u mahadcelinayaa Ra'iisul Wasaaraha iyo ku-xigeenkiisa iyo shirkadaha isgaarsiinta iyo internetka Soomaaliya oo Wasaaradda ka caawiyay inay qaaraankaas bixiso, iyadoo nidaamka lagu bixinayo uu ahaa mid daahfuran." .

**WASAARADDA IYO URURKA ISGAARSIINTA ADDUUNKA**




# heshiis iskaashi

## Dhinacyada aan ka wada shaqeyneyno

- DHISMAHA MACHADKA
- DIYAARINTA SIYAASADDA ICT EE HEER QARAN
- TAAKULEYNTA HAY'ADDA
- TAAGEERO KALE

**Heshiiskii ITU 2017 wuxuu fure u noqon doonaa wada-shaqeyn buuxda**


Dardar-gelinta
MACHADKA
ISGAARSIINTA
QARANKA
Wuxuu dhowaan billaabayaa
barnaamijyo casri ah.
Wixii faahfaahin ah kala soco:
www.nti.so

# WASIIRU KU-XIGEENKA OO KA WARBIXIYAY QORSHAYAASHII SANADKII HORE IYO KUWA SANADKAN CUSUB 2018



**Diseembar, 2017**

Wasiir ku-xigeenka Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyada, Mudane Ibraahim Isaaq Yarow ayaa ka hadlay sida loogu guuleystay qorshayaashii loo dajiyay Wasaaradda sanadkii la soo dhaafay, iyo kuwa sanadka cusub ee la dajiyay.

Isagoo ka hadlayay qorshayaasha, wuxuu sheegay wasiir ku-xigeenka in ansixinta sharcigii isgaarsinta ay ahayd guushii ugu weyneyd ee ay Dawladda Soomaaliya kaa gaarto isgaarsiinta dalka, maadaama sharcigan uu muddo dheer soo jiitamayay, isagoo intaas ku daray in guushaas ay ku timid dadaal dheeraad ah oo ay madaxda Wasaaraddu ku bixisay arrintaas.

Mudane Ibraahim Yarow wuxuu kaloo sheegay in waxyaabaha lagu guuleystay ay ka mid ahayd qorshe loo dajiyay adeegyada teknoolojiyada iyo dib u kicinta Machadka Isgaarsiinta oo ku guuleysay bilihii la soo dhaafay inuu tababar u fidiyo qaar ka mid ah shaqaalaha dawladda.

Wasiiru ku-xigeenka oo ka hadlayay qorshayaasha u dagsan Wasaaradda sanadka cusub ayaa sheegay in madaxda cusub ee Wasaaraddu ay ku guuleysteen in Wasaaradda loo ansixiyo miisaaniyad ka baxsan mushaarka iyo hawl-socodsiinta (running costs), kuwaasi oo loogu talo galay in lagu qabto barnaamijyo lagu horumarinayo isgaarsiinta, teknoolojiyada iyo boostada dalka.

“Waa markii ugu horreysay ee miisaaniyad ka baxsan mushaarka iyo hawl-socodsiinta in loo ansixiyo Wasaaraddan, waxaana miisaaniyaddani ka mid ah mid u gaar ah Hay’adda Isgaarsiinta Qaranka iyo mid u gaar ah Boostada Qaranka, labaduba waa wax ku cusub oo aan ka shaqeynay” ayuu yiri Mudane Ibraahim Yarow.

# Maxaa Inoo Qabsoomay?



- Qorshe Howleedka Wasaaradda
- Ansixinta Xeerka Isgaarsiinta
- Xubinimo Buuxda ee ITU
- Heshiis  Iskaashi ee ITU

- Furitaanka Xarunta Maamulka Internetka ee Hay'adaha Dowladda
- Heshiiska Boostada ee Jabuuti
- Daraasad Baraha Internetka ee Wasaaradaha Dowladda
- Xoojinta Xariirka Wasaaradda iyo Dadweynaha
- Xarunta Wasaaradda oo lagu wada shaqeeyo

"Nabad iyo Nolol"

*Wasiirka Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada*
*Eng. Cabdi Cashuur Xasan*

CASRI

Warsidaha CASRI, waa Lix Biloodle,
ay soo saarto Wasaaradda Boostada


**Cinwaan:**

: **Jamhuria Road, P.O. Box 66, Mogadishu – Somalia.**
@ : **info@mptt.gov.so**
: **http://www.mptt.gov.so**
: **facebook.com/mpttsomalia**
: **twitter.com.com/mpttsomalia**